



## Milicsigii Maarso 14<sup>keedii</sup>

Maalintii Arbacadii, ardayda wadanka oo dhami waxa ay doorteen inay ka hadlaan arrinta nabadgelyada iskuulada. Bulshooyin fara badan oo Iskuulada ah ayaa ardaydu waxa ay ka qeybqaateen qadar aamusnaan ah iyaga oo fasaladoodii bannaanka uag baxay si ay u muujiyaan dareenkooda iyo fikirkoodaba. Waa in aynu dhageysanaa ardayda fikradahooda. Toogashadii ballaarneyd ee cabsida badneyd taasi oo galaafatay nolosha ardayda sanadihii u dambeeyey waxa ay keentay inaynu dhammaanteen ka yeelanayo wada hadal muhiim taasi oo abuurtay “fursad qaali ah.”

Dugsiyada Dadweynaha Portland, bulshooyinka iskuulo gaar ahi markii ay ogaadeen waxa ay hoosta ka xariiqeen dariiqyada horumarinta ee haboon nooca uu yahay iskuulo yeesha daryeel wanaagsani. Xaalado badan oo kala duwan, ardaydu waa kuwa la yimaada hal-abuurnimada iyaga oo hoggaaminayo hawl maalmeedka maalintaasi.

Ardaydeena waaweyni waxa ay qabanqaabiyeen iyaga oo hoggaanka u haya madalo ay ardaydu ay ku cabirayaan aragtidooda. Sidoo kale, Maarso 14keedii, waxa ay ahayd iyana maalin ay in ka badan 700 oo ka mid ah ardayda Dugsiyada Sarre ee Portland iyo macalimiintoodu ay u socdaaleen magaalada Seattle si ay uga qeybgalaan bandhiga gaar ah ee “Hamilton.” Kooxda Muusikada oo ku guuleystay abbaalmarinta waxa ay diirada ku saarayaan aabihii sameeyey Dastuurka Wadanka Maraykan iyo aragtida dimuquraadiyada ee xoriyada shaqsigu. Inta ay ku sugan yihiin Tiyaatarka, ardaydeenu waxa ay ka qeybqaadan inay daqiiqado yar aamusnaadaan oo ardayda bandhiga sameyneysaa ay ku sharfayaan qof kasta oo lagu dilay toogashadii ka dhacday Parkland, Florida. Waxa ay u egtahay inay ku sar go’an tahay qaar badan oo ka mid ah fasalada 11naad ee ardayda barta dariska Dawlada Maraykan inay fursad u heleen in ay ka qeybgalaan fursadani cajiib ah.

Dhammaan iskuulada Portland, maalintii Arbacadii ardaydeenu waxay ay ka qaybgaleen hawlo qiimo iyo waxtar leh. Halwahaas kala duwanaa oo ay ka mid ahayd in ku sameeyaan bannaanka garoonka iskuulada calaamada qaanso-roobaadka ah ama callaamada nabadgelyada, si ay u aamusnaadaan 17 daqiiqo oo lagu sharfayo 17kii arday iyo shaqaalihii naftooda ku waayey Dugsiga Sarre ee Marjory Stoneman Douglas, waxaa kale oo iiyana ka soo qeybgalay xubno ka mid ah waalidiintu iyaga oo hadalo taageero ah ka jeediyey goobihii iskuulada hortiisa ahaa sheegeyna sidii ay iskuuladu u noqon lahaayeen goob nabadgelyo ah.

Waxaan jecelnahay in aan u soo jeedino mahadnaq ballaaran maamulayaasheena, hoggaamiyaasha iskuulada iyo shaqaalaheenaba taageeradii ay siiyeen ardayda sidii ay u xaqiijin lahaayeen waayo-aragnimadaa ay barashadu ku jirtay.

Waxaan fursad u helnay in aan Dugsiga Sarre ee Roosevelt kala qeybgalo munaasabadaasi lagu dhageysanayo ardayda Guddoomiyaha Gobolka Kate Brown, Madaxweynaha Ururka Macalimiinta Portland Suzanne Cohen, Xildhibaan Nick Fish oo matalaya magaalada Portland, iyo Xildhibaan Xeer dejiyaasha Gobolka Oregon ee Lew Frederick ay ku cabirayaan fahamkooda dastuurka dalka u yaala, waxa kale oo ay taageero u raadinayeen nabadgelyada iskuulada iyo in si caqligal ah loo xakameeyo qoryaha, dhinaca kalena waxay ay dhallinyarta da'dooda ah ay xusuusinayeen in codkoodu yahay mid muhiim ah waqtigani adag. Ardaydu waxay noogu yeertay in dadka waaweyni iyo hoggaamiyaashu arrintani tahay mid muhiimadeena leh, sidii ay tallaabo cad uga qaadi lahaayeen. Waxbarashada dadweynaha, waxaan jecelnahay in ardaydeenu arrimaha u fahmaan si maskax furan, iyaga oo si qoto dheer uga fikiraya mawduuc kasta iyaga oo dhinaca kalena isticmaalaya dareenkooda maadaama ay ka mid yihiin dadka dunida ku nool. Subaxii Arbacada garoonka ciyaaraha Dugsiga Roosevelt waxa ay ka maqlnay fahamka xaqiiqada dhabta, iyo sida ay u soo bandhigeen dhibaatooyinka jira, iyo waliba sida ayna mugdi ugu jirin, haddana waxaad arkaysay fikradihii xambaarsanaa dareenkooda ee ay ku cabireen gabayo iyo heeso.

Aad iyo aad baan ugu hanweynahay ardaydeena. Fadlan waxaad ogaataa in aanu idin garab taaganahay. Codkiinu waa mid miisaankiisa leh, idinka oo xaq noogu leh in aad naga rajeysaan in aanu tallaabo qaadno, haddii in uun aan idiin ballanqaadi lahay nabadgelyo iyo taageerada iskuulada.

Dhawaan Golaha Guddida Waxbarashadu waxa ay ansixiyeen qaraar loogu magac daray [“Xasarada Qoryaha ee Iskuuladeena”](#) waxaan ka mid ahaa tallaabooyinka ay ka qaateen ee soo socda:

- Waxa ay Dawlada Dhexe ugu yeedhayaan in ay tallaabo qaado ay ku ilaalineyso caruurta
- Joojinta soo saarista, iibka, iyo dhammaan iibsashada qoryaha yaryar ee darandooriga u dhaca
- Adkeynta in xoog loo baaro dadka iibsanaya hubka
- Inay ka soo horjeedaan in la hubeeyo macalimiinta
- In la kordhiyo maalgalinta xeerasha taageeraya sidii kor loogu qaadi lahaa nabagelyada dhismayaasha
- In kor loo qaado maalgalinta taageerada la taliyaasha iskuulada, shaqaalaha caafimaadka maskaxda, saykoolajiisyada( Cilmi Nafsiga), iyo addeegayaasha bulshada ee iskuulada.

Golaha Iskuulada Magaalooyinka, kaasi oo wakiil ka ah hoggaanka 70 dugsiiyo degmo oo wadanka Maraykan ah ayaa wuxuu soo saaray [hadal qoraal adag](#) oo uu ku muujinayo in si dhab wax looga qabto nabadgelyada ,iyada oo tallaabo la qaado lagaga hadlayo sababtoo ah nabagelyada qorigu waa mid maangal ah, laakiin sidoo kale in maal la galiyo sidii loo taageeri lahaa arrimaha anshaxa iyo dhimirka looga caawin lahaa ardayda ee u baahan gargaar dheeraad ah.

Intaas wax ka badan looma dulqaadan doono. Ardaydeenu waa in ay diirada saaraan sidii ay wax cusub u soo saari lahaayeen iyaga oo dabo socda waxa ay jecelyahay iyo ku guuleysiga dhammeystirka dugsiya sare ama qorshayaashooda shaqo. Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa ka go'an in ay awoodooda dul dhigaam wax kasta oo ay kor ugu qaadayaan taageerada ardayda; si dhabta ahna u xaqiijineyso nabadgelayda dhismayaasha iskuulada. Dhacdadani naxdinta lahayd ee dhawaan dhacday waxa ay ina xasuusineysaa dhammanteen muhiimada ay leedahay tababarada la siiyo ardayda ee lagu barayo sidii ay uga hortagi lahaayeen haddiiba ay timaado xaalad nabadgelyo xumi. Waxa kale oo aan diirada saareynaa inta badan nabadgelyada dhismayaasha oo qeyb ka ah dhaqaalaha maaliyadeed ee dib loogu cusbooneysiinaya iskuulada.

Waxaan jecelanahay inaan u mahadcelino macalimiinteena, kuwaasi oo maalintii Arbacada ahayd siiyey ardaydeena goob una soo diyaariyey casharo wax ku ool ah; waxaan sidoo kale u mahadcelineynaa waayeelkii waalidiinta ahaa ee la socday socdaalkii gaabnaaa ee dugsiya sare ku baxay. Laakiin waxaas oo dhan waxaa ka muhiimsan ee aan rabo in aan idinla wadaagno sida aan ugu han-weynahay ardaydeena u istaagida ay isku taageen xaqooda iyo in la maqlo codkooda ku aadan arrimahani muhiimka ah. Hoggaan ahaan waan ku faraxsanahay iyada oo ay naga go'an tahay in aan anakuna muujino mid la mid ah sida ay u muujiyeen arrimihii ay ka hadleen ardaydeenu. Intaasi wax ka badan looma dulqaadan karo.

Guadalupe Guerrero  
Guddoomiyaha Waxbarashada

Paul Anthony  
Xubin Agaasinka Golaha

Julia Brim-Edwards  
Madaxa Golaha

Scott Bailey  
Xubin Agaasinka Golaha

Julie Esparza Brown  
Xubin Ku-Xigeenka Golaha

Amy Kohnstamm  
Xubin Agaasinka Golaha

Rita Moore  
Xubin Ku-xigeenka Golaha

Mike Rosen  
Xubin Agaasinka Golaha